



Diiradda la saarayo: Faa'iidooyinka daryeelka ilkaha

Daryeelka ilkahaaga iyo ciridkaagu waa hab muhiim ah oo lagu daryeelo caafimaadkaaga guud. Waa sababta daryeelka ilkaha loo daboolo isaga oo qayb ka ah faa'iidooyinkaaga Health Share/CareOregon.

Xirmadaada kaalmada ilkaha waxaa kamid ah adeegyada sida:



Baaritaanada, raajada iyo nadaafadda*



Buuxinta ilkaha ee xubnaha 15 sanno jirada ah ama kasii yar*



Ku daaweynta maadada fluoride*



Nadiifinta aadka ah ee loogu tala galay cudurada ku dhaca cirridka



Buuxinta



Saarista ilkaha



Dahaarka ilkaha* (kooban)



Qoddada ilkaha* (kooban)



Ilkaha macmalka ah oo buuxa ama qayb ah (kooban)



Biraha ilkaha lagu xirto ee loogu tala galay xubnaha 20 sanno jirrada ah ama kasii yar*

Xanibaado ayaa laga yaabaa in la saaro iyo/ama in loo baahdo ogolaansho horudhac ah. Xiddig () dulsaaran macluumaadka kaalmooyinka micnaheedu waa in ay suurtagal tahay in adeegga laga daboolayo si xadka ka baxsan xubnaha da'doodu ka yartahay 21 sanno, haddii ay caafimaad ahaan lagama maarmaan noqoto ayna haboontahay.*

Helitaanka dhakhtarka ilkaha

Waxaanu iskaashi la leenahay qorshayaasha ilkaha ee degaanka si aad u arki karto dhakhtarka ilkaha oo wax lacag ah ayna kaaga baxaynin. Qorshahaaga ilkuhu wuxuu ku qoran yahay kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo. Waxay kaala shaqeeyaan sidii loo daryeeli lahaa baahiyahaaga ilkaha. Wac iyaga marka aad u baahan tahay daryeelka ilkaha ama aad hayso su'aalo ku saabsan caafimaadka afka, ka hor inta aadan raadsan daryeelka xaalada degdega ama dhakhsaha ah.

Dhakhtarkaaga ilkuhu:

- ▶ Waa qofka koowaad ee aad la xiriirayso marka aad u baahan tahay daryeelka ilkaha, marka laga reebo xaalada degdeg ah oo nafta halis galinaya sida dhiig baxa aan la xakameyn karin.
- ▶ Wuxuu qaban qaabiyaa daryeelka ilkaha ee gaarka ah, haddii aad u baahan tahay iyada.
- ▶ Wuxuu hayaa diiwaannadaada ilkaha wuxuuna si fiican u yaqaan caafimaadka afkaaga, si uu kuugu fidin karo talada u fiican xataa haddii ay jirto xaalad degdeg ah.



Ayay tahay in uu arko dhakhtarka ilkaha?

Qof kasta! Laakiin daryeelka ilkaha ee joogtada ah ayaa aad ugu muhiimsan dadka uurka leh, qaba sonkorowga ama xaalado caafimaad soo jireen ah, iyo carruurta.

Su'aalaha? Haddii aad caawimaad uga baahan tahay helitaanka dhakhtarka ilkaha ama hayso su'aalo ku saabsan faa'iidooyinka ilkaha, la xiriir qorshahaaga ilkaha. Lambarkoodu wuxuu ku qoran yahay kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo. Haddii aad u baahan tahay in aad beddesho qorshahaaga ilkaha ama u baahan tahay wax caawimaad ah oo kale, waxaad **Adeega Macmiilka Health Share ka wacdaa 888-519-3845 ama TTY 711**, ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Wax ka ogow CareOregon

Faa'iidooyinka ilkaha iyo adeegyada waxaa caymiskooda daboolaa CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqiijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

Oregon Health Authority

Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

health share
Health Share of Oregon

CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa isku duwida adeegyada caafimaadka afka ee loogu talagalay xubnahayaga ee la adeegsanayo hawl wadaagayaasha dhanka ilkaha ee aanu leenahay: CareOregon Dental, ODS Community Dental, Advantage Dental Services iyo Willamette Dental Group.

CareOregon

Dakhtarkaaga ilkaha — ama bixiyaha daryeelka ilkaha ee aasaasiga ah (PDP) — ayaa isku duwa daryeelkaaga caafimaadka afka iyada oo ay weheliyaan qorshahaaga ilkaha iyo CareOregon. Waxay sidoo kale la shaqeeyaan xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah, farmashiistayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 800 224 4840 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.